

Ma dooneysaa inaad wax badan ka ogaato tallaalka COVID-19 ee Carruurta?

Daawada tallaalka COVID-19 wee shaqaynaysaa oo waxa ee ilaalineysaa xubno badan oo ka mid ah bulshadeenna. Gaar ahaan, kuwa dugsiyada iyo meelaha daryeelka ilmaha jooga ama dhigta. Ilaalinta carruurteena iyo kuwa ku xeeran waxee noo tahay muhiin.



Halyey-yadayada tallaalka ayaa naga caawiya hadafkan!

Qof kasta oo da'diisu tahay 5 sano ama ka weyn wuu heli karaa tallaal. Waa ammaan/safe, in la qaato tallaalka COVID-19. Waxeeynu bulshada kula talineynaa in ee wada qaataan tallaalka, xitaa hadii uu horay kuu qabatay jirada COVID-19!



MAXAA ILMAHAYGA LOO TALLAALAA?

- Tallaalka COVID-19 wuxuu carruurta ka ilaaliyaa jirro halis ah oo uu keeno COVID-19. Tallaalku wuxuu kaloo kaa caawinayaa hubinta inay weli aadi karaan dugsiyada, hawlaha iyo daryeelka carruurta.
- Marka ilmaha laga tallaalo COVID-19, waxaa yaraanaysa halista xoogan oo kasoo gaari karta caruurta iyo dadka agjooga, sida qoyska iyo asxaabta.

SIDEE IYO HALKEE AYAAN ILMAHAYGA TALLAAL KOODA KA HELI KARAA?

- Waa sahliday helitaanka tallaalada COVID-19. Dhammaan rugaha caafimaadka bulshadeennu waxay furan yihiin waqti kaste si balan la'aan ah. Waxaa aadi kara qof kasta oo 5 jir ah ama ka weyn si ee u qaataan tallaalka 1aad ama kan 2aad. Ballamo looma baahna!
- Waalidiintu waxay qabsan karaan ballan iyagoo isticmaalaya website-kan: Ontario.ca/BookVaccine
- Rugo caafimaad oo badan ayaa imaanaya xaafadaada ama xaafada kuu dhow. Xannaano-dugsiyeedyo ayaa bilaabmi doona Jannaayo 21, 2022. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah halkan, OttawaPublicHealth.ca/ChildCovid19Vaccine.
- Farmashiyo badan ayaa sidoo kale soo dhaweynaya qof kasta oo da'diisu tahay 5 sano iyo ka weyn xagga tallaalkooda.

Kuwa bixinaya tallaalka waxeey tababar ku sii qaateen sida loo caawiyo waalidiinta, daryeelayaasha iyo carruurta inta lagu jiro waqtiga balanta tallaalka. Waa ee ka jawaabi karaan su'aalahaaga waxayna kugu gacan siin karaan ilmahaaga inta aad ku jirto waqtiga ballanta.

GOORMA AYEE ILMAHAYGU U BAAHAN YAHAY QAADASHADA TALLAALKA 2AAD?

- Caafimaadka Dadweynaha Ottawa waxay ku talinaysaa inaad sugto sideed toddobaad inta u dhaxaysa qiyaasta koowaad iyo labaad ee tallaalka mRNA COVID-19 (Pfizer/Moderna).
- Awooda tallaalka wuu xoog badan yahay oona kasii muddo dheer yahay marka la sii kala fogeeyo qaadashada tallaalka kowaad iyo kan labaad.
- Haddii aad door bidayso, waad siin kartaa ilmahaaga tallaalka labaad hadii ee 21 maalmood ka soo wareegatay talaalkii 1aad. Waan in aad siisaa ogolaansho la wargaliyay mid ka mid ah rugahayaga caafimaadka ama adigoo wacaya qadka 1-833-943-3900.

HALKEE AYAAN KA HELI KARAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

Ka hel jawaabaha su'aalahaaga dhanka ilo wanaagsan. Caafimaadka Dadweynaha Ottawa iyo CHEO waxay hayaan macluumaad badan iyo ilo si ay u caawiyaan waalidiinta, bixiyeyaasha daryeelka, iyo qoysaska OttawaPublicHealth.ca/ChildCovid19Vaccine, cheo.on.ca, kidshealthfirst.ca. Xitaa waxaad naga soo wici kartaa adigoo la hadlaya kalkaaliso caafimaad halkan 613-580-6744.